

Bulshada CCS ee Qaaliga ah,

Sida aad ka warqabto, Caafimaadka Dadweynaha Columbus (Columbus Public Health) waxay baarayaan/baadhayaan kiisas la xaqiijiyey oo jadeeco ah (measles) oo ka dhacay meelo badan oo ah goobaha caamka/maxalliga ah ee dadwaynuhu isugu yimaado ee ah agagaarka magaalada halkaas oo ay jadeecadu ku faafato/lagu kala qaado.

Jadeecada waa cudur laga hortagi karo oo aad loo kala qaado oo hawada ku faafa marka qof cudurka qaba/gudbiyaha uu qufaco ama hindhiso. Waxa ugu muhiimsan ee qof kasta uu samayn karo si uu uga hortago jadeecada waa in la helo tallaalka jadeecada-mumps-rubella (MMR), kaas oo bad-qab/badbaado leh oo aad waxtar sare u leh. Hal qiyaas/hal kuuro oo MMR ah ayaa 93% waxtar u leh ka hortagga jadeecada, iyo laba qiyaasood/kuuro ayaa 97% waxtar u leh ka hortagga jadeecada.

Dugsiyada Magaalada Columbus hadda kama jiraan wax kiisas ah oo la soo sheegay oo ku saabsan wax arday ah oo laga helay jadeecada oo ah degmada gudaheeda.

Sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo jadeecada waa tallaalka. Tallaalka MMR waa mid ka mid ah tallaalada dugsiyada u baahan yahay. Kalkaaliyayaasha CCS waxay la socdaan heerka tallaalka arday kasta. Waxay ku siin karaan macluumaadka ku saabsan halka ardaydu ka heli karaan tallaalka haddii aanu/uusan dhamaystirnayn. Nidaamkan/Habkan waxaa la dhammeeyaa bilawga sannad-dugsiyeed kasta waxaana lamariyaa arday kasta oo cusub oo is-diiwaan-gelisa.

Haddii ilmahaagu jiro 12 bilood ama ka weyn oo aan laga tallaalin MMR, waa inaad isla markiiba ka tallaashaa. ***Fadlan ogow: Carruurta aan la tallaalin waxaa laga yaabaa in laga saaro dugsiyada haddii uu ka jiro kiis ah dugsiyada. Waxaa kale oo laga yaabaa in laga saaro dugsiyada haddii ay kala kulmaan/ka qaadaan jadeeco bulshada dhexdeeda.***

Qoysasku sidoo kale waxay heli karaan tallaalada iyaga oo u maraya rugaha tallaalka iyaga oo kaashanaya/la shaqaynaya Caafimaadka Dadweynaha Columbus (Columbus Public Health) iyo Cisbitaalka Guud ee Carruurta (Nationwide Children's Hospital). Tallaalada ayaa diyaar u ah qoysaska iyo ardayda u baahan tallaalka kasta, oo ay ku jiraan MMR. Intaa waxaa dheer, Caafimaadka Dadweynaha Columbus (Columbus Public Health) ma jirto ballan loo baahan yahay (toos u-tag) tallaalka jadeecada ee loogu talagalay qof kasta oo jira hal sano iyo ka weyn. Tallaalka MMR waxa kale oo laga heli karaa bixiyayaasha daryeelka caafimaadka.

Maxay waalidiintu qaban/samayn karaan?

- Marka hore/koowaad, hubi heerka tallaalka qoyskaaga oo dhan/idil. Dhammaantiin ma dhamaystirteen/ma qaadateen tallaalka jadeecada?
- Adeegyada Caafimaadka Dugsiyada Magaalada Columbus waxay bah-wadaag yihiin/iskaashi la sameeyaan Caafimaadka Dadweynaha Columbus (Columbus Public Health) si ay ula socdaan xaaladaha jadeecada waxayna bixin doonaan hagitaan/talooyinka ku habboon baaritaanka iyo karantiil haddii loo baahdo.
- Tallaalku waa bad-qab/badbaado aadna waxtar ugu leh ka hortagga jadeecada. Waxaad la xiriiri/xidhiidhi kartaa daryeel bixiyahaaga
- caafimaadka ama kalkaalisada dugsiyada ilmahaaga haddii aadan hubin in ilmahaaga la tallaalay iyo in kale.
- Haddii qof gurigaaga jooga uu ku dhco/qaado ama ay isku arkaan calaamado ka mid noqon kara jadeecada, fadlan guriga joog oo ha aadin dugsiyada oo la xiriiri/xidhiidh bixiyaha caafimaadkaaga.
- Ardayda haysta/qaadatay ugu yaraan hal qiyaas/kuuro (dose) oo tallaalka MMR ah uma baahna in aad go'doomiso/qo-qob-to ka dib marka ay jadeecada soo gaarto/ku dhacdo/qaadaan.
- Dabool qufaca, dhaq/mayr/maydh gacmaha oo kaga nadiifi/kaga tir-tir jeermis dilaha badanaa meelaha kore/sag-xadaha inta badan la taabto

Haddii aad rabto macluumaad guud oo dheeraad ah oo ku saabsan jadeecada (measles) ama aadan hubin xaaladda/heerka tallaalka ilmahaaga, la xiriiri kalkaalisada dugsiyada ee dugsiyada ilmahaaga. Waxaad sidoo kale kala xiriiri kartaa Caafimaadka Dadweynaha Columbus (CPH) ee bogga ah [Columbus.gov/measles]Columbus.gov/measles. Qof kasta oo su'aalo qaba wuxuu kaloo ka wici karaa CPH taleefoonka ah 614-645-1519.

Halkan waxaa ah liiska Su'aalaha Inta badan La Isweydiyo ee ka yimaada Caafimaadka Dadweynaha Columbus (Columbus Public Health) oo leh macluumaad dheeraad ah.

Measles 12.5.22 Somali